


## Qoraallada Digniinta ah

Marmarka qaarkood dhajis ayaa lagu daraa qoraalka dawo dhakhtar qoray, ama digniin ayaa lagu ag daabacaa qoraalka.

Tusaale ahaan, digniintani waxay leedahay, "Ha qaadan dawadan haddii aad uur leedahay".

Do not take other medicines without checking with your doctor or pharmacist	<b>Main Street Pharmacy</b> (612) 555-1234
	<b>1200 Main Street North, Minneapolis, MN</b>
	Dr. R. Wilson
	<b>Rx No: 300443-1</b> 12/04/2005
	<b>JOHN JOHNSON</b>
	TAKE ONE TABLET BY MOUTH, DAILY.
	<b>Zocor Tabs</b> Mfg Merck
	Qty: 30
	REFILLS: 3 BEFORE 12/08/04
	 <b>DO NOT TAKE THIS DRUG IF YOU BECOME PREGNANT</b>

Digniintani waxay leedahay, "Ha qaadan dawooyin kale adiga oo weydiiya dhakhtarkaaga ama farmasiilaha mooyaane".

Waxa jira dhawr nooc oo ah qoraallo digniin. Qoraallada qaarkood waxay kuu sheegayaan meesha dawada lagu kaydiyo. Tusaale ahaan:

Qaboojiyaha gali.



Ku kaydi meel qabow oo engegan.



Ka fogee tiigsiga caruurta.



**Qoraallada qaarkood waxay kuu sheegaan sida loo qaato dawada. Tusaale ahaan:**

Si wacan u rux ka hor intaanad isticmaalin.



Waa in dawada lagu qaato biyo badan.



Qaado dawadan \_ saac cuntada ka hor.




**Qoraallada qaarkood waxay sheegaan waxa la sameeyo marka la qaadanayo dawada. Tusaale ahaan:**


Waxa muhiim ah inaad u qaadatid ama u isticmaashid sida lagu sheegay oo sax ah. Ha ka boodin qaadasho ama ha joojin isticmaalka dawada iyada oo dhakhtarkaagu sidaa amro mooyaane.



Waa inaad iska ilaalisid soo-gaadhista iftiinka cadceedda oo toos ah iyo/ama iftiinka xoogga leh oo mudo dheer kugu dhaca ama siyaado ah inta aad qaadanaysid dawadan.




Waxa dhici karta in dawadani qasto calooshaada. Ku qaado busgud, rooti ama roodhi iyo ama cunto yar.



**Qoraallada qaarkood waxay kuu sheegaan waxa aan la sameynin marka aad qaadanaysid dawada. Tusaale ahaan:**

Ha cabbin cabbitaanada aalkolada ah inta aad qaadanaysid dawadan.



Ha cabbin caano ama ha cunin waxyaabaha caanaha laga sameeyay inta aad qaadanaysid dawadan.



Waa inaan afka laga qaadan.




**Qoraallada qaarkood waxay kuu sheegaan waxyeellooyinka dawada. Tusaale ahaan:**


Waxay keeni kartaa lullo ama hurdo-hurdo ama dawakh.



Marka aad qaadanaysid dawadan waxa yaraada awoodda kiniinka joojinta uurka. Isticmaal hab uur joojin dheeraada ah ama beddelaad ah.



Waxa laga yaabaa in dawadani waxyeello u geysato awoodda baabuur lagu wadi lahaa ama mishiin lagaga shaqeyn lahaa. Taxadir yeello ilaa aad ka garanaysid waxyeelladeeda.



Akhri dhamaan warka ku yaalla qoraalka dawadaada dhakhtarku soo qoray. Haddii aanad fahmin, weydii dhakhtarkaaga ama farmasiilaha.



Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan qoraallada dawooyinka aad iska iibsan kartid warqad dhakhtar la'aan (OTC) ka eeg Qoraallada Dawooyinka OTC.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan dawooyinka dhakhtarku soo qoro ka eeg Qoraallada Dawooyinka Dhakhtarku Qoro.

Wixii ah war dheeraad ah ee ku saabsan waxyeellooyinka dawooyinka ka eeg Waxyeellooyinka.